



# Dab-sheege

Guri kasta waa in uu ku jiraa dab-sheege. Qalabka digitaanka waxaa laga helaa tusaale ahaan badanaa dukaamada cuntada ee waaweyn iyo dukaamada qalabka dhismaha. Qalabka digniinta ee ugu raqiisan waxay joogaan wax kayar 10 €.

Dab-sheegaha waxaa lagu dhejiyaa saqafka. Goobaha ku fican qalabka digniintu waa qolka fadhiba, qolka jiifka ama marinka dhewe ee guriga. Haku xirin qalabka digniinta jikada ama musquusha qubayska. Guryaha waa weyn waxay u baahan yihiin dhowr qalabka digniinta ah.

Tijaabi in uu qalabka digniintu shaqaynayo adigoo riixaya badhanka tijaabada. Qalabka digniintu wuu shaqaynayaa, haddii uu si la maqli karo u dhiiqleeyo. Waxaa wanaagsan in shaqada qalabka digniinta si joogto ah loo tijaabiyo.

Qalabka digniinta ee shaqaynaya wuxuu mararka qaar ka bilig-siiyaa nal casaan ah. Marka uu batarigu dhammaan rabo, wuxuu qalabku sameeyaa dhiiqlayn wakhtiyoo gaagaaban ah. Markaas beddel batariga.

Qalabka digniinta oo dhan beddel, haddii aanay shaqaynayn, xittaa haddii batariga la beddelay. Wakhtiga uu qalabka digniintu shaqeeyo waa ugu badnaan 10 sano.

Marka aad guriga ka guurayso, qalabka uga tag saqafka.





# Nabad ku joogista guriga

Taxaddar oo feejignow, markasta oo aad dabka isticmaalayso.

Markasta ilaali cunto-karinta. Alaab haku keydin shooladda ama foornada. Haddii aad sakhraansantahay ama aadan sababo kale dartood xayi u ahayn, waxaa kuu ammaan badan in aad cunto dalbato!

Isticmaal qalab koronto oo bed-qaba oo kaliya. Haka ka tegin qalabka (sida makinadda dharka dhaqda ama makiinadda kafeega) oo daaran, marka aad guriga ka baxayso. Xusuusnow in aad sidoo kale derbiga ka siibto jaarjarada, marka aadan wax jaarjaraysanayn.

Haddii aad sigaar cabayso, bannaanka ku cab.



## Marka uu dab kaco

**Badbaadi dadka halista ku jira.**

**Dammi dabka, haddii aad awooddo.**

**Ka bax beesha albaabadana xir.**

**Wac 112.**

**Ku hag ciidanka dab-damiska goobta.**



Iyadoo aan dab kicin ayuu qalabka dabka sheegaahi mararka qaar digniin sameeyaa. Tusaale ahaan gamaarka ama urka adag ee cuntada ayaa digniinta sababi kara. Inyar riix badhanka tijaabada, sidaas ayeey digniintu ku joogsanaysaa. Layri guriga.

Haddii ay marar badan dhacaan digniinno macno-darro ah, waxaa laga yaabaa in qalabka digniintu u uu dhowyahay shooladda waana in markaas meel kale loo wareejijo.



## Macluumaad ku saabsan badbaadada dabka

Bogaggeenna internetka: <https://pelastustoimi.fi/koti-ja-arki>  
(finnish, iswiidhish, ingiriis)

Nagala soco janaalada warbaahinta bulshada: @stadinbrankkari